

Dowladda Soomaaliyeed ee Puntland Wasaaradda Qorsheynta, Horumarinta Dhaqaalaha iyo Iskaashiga Caalamiga ah Waaxda Tirokoobka Puntland



TUSAHA SICIRKA ADEEGGA DAMBIISHA

MAAJO 2020

Warbixinta Tusaha Sicirka Adeegga Dambiisha ee Bisha Maajo


Dhaqdhaqaaqa Billaha ee Tusaha Sicirka Adeegga Dambiisha

Tusaha Guud ee Sicirka Adeegga Dambiisha (TSD) qeybahiisa kala-duwan ayaa intii lagu guda jiray bishii Maajo 2020 wuxuu kaso kacay 87.66 isaga oo gaaray 88.11. Isbedelka bishii Maajo ayaa ah koror dhan 0.51 boqolkiiba, halka uu bishii ka horeysay ee Abriil 2020 uu ka ahaa koror dhan 1.60 boqolkiiba.

Qaybaha badeecadaha ee sicirkoodu bishaan sida xoogan u siyaaday marka loo eego qeybaha kale ayaa kala ah: Makhaayadaha & Hoteeladda (3.25%), Badeecadaha iyo Adeegyada iskujirka ah (2.23%), Dharka iyo Kabaha (1.07%), Caafimaadka (0.89%), Cuntada iyo cabitaanadda (0.60%).

Dhinaca kale, hoos u dhac ayaa ku yimid sicirka Tubaakada iyo Jaadka (-0.49%), qeybaha Kirada Guryaha, Korantada, Biya iyo shidaalka (-0.20%), Gaadiidka (-0.16%). Hoos u dhacaan ayaa dheelitiray isbedelka togan ee ku dhacay sicirka badeecadaha kor ku xusan, taas oo horseeday isu dhowaanshaha heerka Tusaha guud ee sicirka Dambiisha iyo Jiitimaad ku sugnaansha Jaantuuska dhaqdhaqaaqa Tusaha guud ee sicirka Dambiisha


Jaantuuska 1aad: Jaantuusyada Heerka Sicir Baraka Iyo Dhaqdhaqaaqa Tusaha Guud Ee Sicirka Dambiisha Abriil 2020



Jadwalka 1aad: Heerka Sicir bararka billaha ah ee -Maajo 2020 (2015=100)

Tusaha Sicirka Dambiisha, May	
Tusaha (bishan) = May 2020	88.11
Tusaha (bishii hore) = Abriil 2020	87.66
Tusaha (sanadkii hores isla bishan) = May 2019	84.79
Isbedelka % bilaha ah = Abriil 2020/ May 2020	0.51
Isbedelka % sanadlaha ah (heerka sicir bararka) = May 2019/May 2020	3.91

Jaantuuska 2aad: TSD, Isbedelada Ugu Waaweyn Ee Bilaha Ah Iyada Oo Loo Eegayo Hanaanka Caalamiga Ah Ee Kala Saarida Qaybaha Badeecadaha.



Qaybaha Isbedelka Togan ee Xooga-leh Ku Yimid Bisha Abriil 2020

- **Makhaayadaha iyo Hoteelada** ayaa kor u kacay (3.25%) bishii Maajo 2020 haseyeeshee kor u kocaan ayaa aad uga hooseya kororkii bishee ka horeysay ee Abriil 2020 oo uu kordhcay (10.32%). Kororka uga badan ee qeybta Makhaayadaha ee bishan wuxuu ka yimid sicirka cuntooyinka makhaayada oo siyaaday (3.66%).
- **Agabka iyo Adeegyada isku jirka ah** ayaa kor u kacay (2.23%) bishii Maajo 2020 marka loo barbardhigo bishii Abriil 2020 oo uu ahaa (-1.76%). waxaa sababay kor u kaca bishan sicirka agabka Daryeelka Shakhsiga ah kaas oo kordhay (2.70%).
- **Sicirka qeybaha Dharka iyo Kabaha** ayaa kor u kacay (1.07%) bishii May 2020 marka la barbar dhigo bishii Abriil oo uu ahaa (3.80%). kororkan bishaan waxaa loo tirinayaa qiimaha

Dharka oo kacay (0.76%) iyo kabaha oo iyana kacay in u dhiganta (0.31%).

- **Sicirka dawooyinka, adeegga iyo agabka Caafimaadka** ayaa kor u kacay (0.89 %) bishii Maajo 2020 marka la barbar dhigo bishii Abriil oo uu ahaa (0.80%). kororkan waxaa sababay sicirka Adeega Bukaani Socodka oo siyaaday (1.72%).
- **Cuntada iyo Cabitaanada** ayaa sicirkoodu kordhay (0.60%) bishii May 2020 marka loo barbar dhigo bishii hore ee Jnaayo oo uu ahaa (2.01%), kororkan waxaa loo aanaynayaa inuu sababay cuntada (0.61%). Iyo Cabiitaanada (0.28%).

Qaybaha Isbedelka Taban ee Xooga-leh Ku Yimid Bisha Maajo 2020

- **Tubaakada iyo Jaadka** ayaa sicirkoodu hoos u dhacay (-1.49%) bishii Maajo 2020 marka la barbar dhigo bishii hore ee Abriil oo uu kordhay (8.31 %) hoos u dhacan ayaa loo sababaynayaa inuu keenay sicirka Jaadka (-1.49%) , iyo Tubaakada (-1.49%) .
- **Sicirka adeegyada Kirada guryaha, Korantada, Biyaha, iyo Gaaska** ayaa hoos u dhacday (-0.20) bishii May 2020 marka la barbar dhigo bishii hore ee Abriil oo uu ahaa (0.02 %)) hoos u dhacan ayaa loo sababaynayaa inuu keenay sicirka biyaha (-0.88%), iyo Korantada (-0.38).
- **Sicirka raacista Gaadiidka** ayaa hoos u dhacay (-0.16 %) bishii Maajo 2020 marka la barbar dhigo bishii Abriil oo uu ahaa (0.29%) hoos u dhacan ayaa loo sababaynayaa inuu keenay sicirka Agabka dayactirka iyo hagaajinta Gawaaridda (-10.43%).

Tusaha Sicirka Dambiisha: Qaybo Si Gaar Ah Loo Eegay ee Bisha Maajo 2020

Qaybaha **cuntada iyo cabitaanada, Kirada guryaha, adeegyada, biyaha, korontada, Gaaska iyo Shidaaladda kale** ayaa celcelis ahaan hadda ah qaybaha ugu muhiimsan dambiisha Adeegga, maadama ay saamiga ugu badan ka yihiin kharashaadka qoysaska, tan ayaa ka dhigaysa qeybahan inay saamaynta ugu badan ku yeeshaan isbedelka Tusaha guud ee Sicirka Dambiisha.


Sicirka cuntada iyo cabitaanada ayaa intii lagu jiray bishii Maajo wajahay Kor u kac dhan (0.60%). marka loo barbar dhigo (2.01 %) oo uu kor u kacay bishii Abriil 2020. Sicir bararka sanadlaha ah ee qaybta cuntada iyo cabitaanada sanad dhamaadka bisha Abriil 2020 ayaa kordhay (2.02 %) marka loo barbardhigo sicir bararka Maarso 2020 ee kabil kabil oo uu kordhay (3.04%).

Jadwalka 2aad: Isbedelka Billaha ee qeybaha ugu muhiimsan Cuntada

Magaca shayga	Maarso	Abril	Maajo
Cuntada iyo Cabitaanada	1.51	2.01	0.60
Cuntada	1.58	1.96	0.61
Rootiga, Bariisaka, Burka iyo badarka	2.28	-1.65	0.70
Sonkorta	0.00	6.58	-1.02
Hilibka noocyada xoolaha	0.32	-0.15	-0.89
Kalluunka	0.00	0.00	-0.01
Caanaha liiska ah iyo kalluunka	1.21	6.29	2.20
Saliida iyo ashyaada dufanka leh	0.47	4.17	-0.45
Miro Beeraadka sida Yaanyada	11.00	0.59	1.53
Khudaarta Cagaaran	0.05	1.67	0.98

Sicirka qaybta Kirada guryaha, adeegyada biyaha, korontada, Gaaska iyo Shidaalada kale ayaa bishii Maajo celcelis ahaan hoos u dhacay (-0.02%) halka uu bishii Abriil kor u kacay (0.02%). Halka sicir bararka kabil kabil ee Maajo uu siyaaday (1.88%) marka loo barbar dhigo sicir barar ka sanad dhammaadkii Abriil 2020 uu ahaa (4.63%).

Jaantuuska 3aad: TSD Guud Iyo Qeybo Si Gaar Ah Loo Eegay




Source: Puntland Statistics Department

Dhaqdhaqaaqa Sanadlaha ee Tusaha Sicirka Dambiisha ee Sanad Dhamaadka Abriil 2020

Isbedelka sanadlaha ah ee heerka sicir bararka ee 12kii billood ee u dhexeeyey billihii Maajo 2019 iyo Maajo 2020 ayaa ahaa 3.39 boqolkiiba, halka sanad dhammaadkii Abriil 2020 uu kordhay 5.08 boqolkiiba.

Qaybaha badeecadaha ee sicirkoodu sida xoogan u siyaday 12-kii bilood ee u dhexeeyay Maajo 2019 iyo Maajo 2020 ayaa kala ah: Tubaako iyo Jaad (+20.40%), Dharka iyo Kabaha (+15.27%), Waxbarashada (10.17%), Dhaqanka iyo Madadaalada (+8.35%), Badeecadaha iyo Adeegyada iskujirka ah (6.99%). Caafimaadka (6.42%).

TSD: Jaantuuska 4aad; Sicir-bararka sanadlaha ah ee qeybaha badeecadaha iyada oo loo eegayo hanaanka caalamiga ah ee kala soocida badeecadaha; Abriil 2020.



Qaybaha sicir bararka Xoogan ee sanadlaha ah uu ku dhacay sanad dhamaadka Maajo 2020

- **Sicirka Tubaakada iyo Jaadka** ayaa sanad dhammaadkii bisha Maajo 2020 kor u kacay 20.40% halka uu sanad dhamaadkii Abriil 2020 uu kordhay 25.55 %. Kor u kacay ayaa ka yimid: Jaadka (+29.18%). iyo Tubaakada (+15.48%).
- **Sicirka qeybaha Dharka iyo kabaha** ayaa sanad dhmmaadkii Maajo 2020 Kor u kacay 15.27%, halka sanad dhamaadkii Abriil 2020 uu kordhay 17.04%, kor u kacay waxaa sababay sicirka Dharka (+21.10%),

- **Waxbaashada** ayaa sanad dhammaadkii bishii Maajo 2020 Kor u kacay 10.17%, halka sanad dhamaadkii Abriil 2020 uu kordhay 10.17% sare u kacaan waxaa sababey qiimaha waxbarsha Dugsiyada Sare (17.33%) iyo Waxbarashada Aasaasiga ah (6.16%) oo biillhi u dambeeyey lagu kordhiyey khidmadaha imtixaanaadka.
- **Agabka dhaqanka iyo Madadaalada** ayaa sanad dhammaadkii Maajo 2020 Kor u kacay 8.35%, halka sanad dhamaadkii Abriil 2020 uu jiray qiima koror dhan 8.64 % Sicir kororkan waxaa sababay alaabada iyo adeegyada isku jirka ah ee mada daalada oo kordhay (50.57%) iyo qalabka sawirada iyo wax duubista (+15.70%).
- **Badeecadaha iyo Adeegyada iskujirka ah** ayaa sanad dhammaadkii Maajo 2020 Kor u kacay 6.99% marka la barbardhigo sanad dhamaadkii ka horeeyey ee Abriil 2020 oo uu kor u kacay 9.49%. Badeecadaha loo aanaynayo hoos u dhacaan ayaa ah agabka ilaysku qurxiyo (10.16%), iyo agabka Daryeelka Shakhsiga ah (6.21%).
- **Caafimaadka** ayaa sanad dhammaadkii Maajo 2020 kor u kacay 6.42% marka la barbardhigo sanad dhamaadkii ka horeeyey ee Abriil 2020 oo uu kor u kacay 5.74% Sicir kororkan waxaa sababay Adeegyada Cusbitalada oo siyaaday (+25.67%), iyo sicirka adeega bukaan jiifka (6.84%)


Dhamaan isbedelka sicirka qaybaha TSD ayaa sanad dhamaadkii Abriil 2020 ahaa mid togan.

Tusaha Sicirka Adeegga Dambiisha: Sookoobidda dhaq-dhaqaaqaha iyo Dhibco ku biirinta Miisaaman

Jadwalka 3: Tirooyinka ugu muhiimsan dhaq-dhaqaaqyada Maajo 2020 (Index = 100 at 2015)

COICOP Classification Group	May-19 Index	Apr-20 Index	May-20 Index	Apr-20 to May-20 (monthly) % change	May-19 to May-20 (annual) % change
TSD ee dhaman qaybaha badeecadaha	84.79	87.66	88.11	0.51	3.91
Cuntada iyo Cabitaanada	84.07	85.25	85.76	0.60	2.02
Tubaakada iyo Jaadka	82.48	100.81	99.31	-1.49	20.40
Dharka iyo Kabaha	82.34	93.91	94.91	1.07	15.27
Kirada guryaha, Biyaha, korontada, Gaaska iyo Shadaalda	85.13	86.90	86.73	-0.20	1.88
Agabka guryaha iyo Dayactirkooda	85.53	87.94	88.45	0.58	3.41
Caafimaadka	79.99	84.37	85.13	0.89	6.42
Gaadiidka	88.59	91.58	91.43	-0.16	3.21
Isgaarsiinta	85.68	87.67	87.64	-0.03	2.29
Dhaqanka iyo Madadaalada	96.05	104.02	104.07	0.05	8.35
Waxbarashada	82.32	90.70	90.70	0.00	10.17
Maqaaxiyaha iyo Huteelada	80.25	81.62	84.27	3.25	5.02
Badeecadaha iyo Adeegyada isku jirka ah	111.20	116.38	118.97	2.23	6.99

Jaantuuska 5aad: Ku Biiriinta dhibcaha iyada oo la eegayo miisaanka Qeyb waliba leedahay



Source: Puntland Statistics Department

FG: Saameynt ay qayb kasta oo kamid ah qeybahaha uu kakooban yahay hanaanka kala soocida badeecadaha ay ku yeelanayso isbedelka Tusaha guud ee Sicirka Adeegga Dambiisha waxay ku xiirantahay hadba saami culeyska ay qeyb walba ka tahay culeys dhismeedka Guud.